

Around the Airport

DHISMAHA 2020 AGAGAARKA GAROONKA MSP AIRPORT

Ogsoonow shaqada weyn ee jidadka agagaarka Minneapolis-St. Paul Garoonkooda Caalamiga ah oo soconeysa Abriil ilaa Deyrta 2020.

MINNESOTA
5



MINNESOTA 5:

- › Dhinaca bari Highway 5, I-494 ilaa Davern St. ee Saint Paul, waxaa la xirayaa laga bilaabo Abriil ilaa bartamaha Julay.
- › Dhinaca galbeed Highway 5, laga bilaabo Highway 62/55 illaa I-494, waxaa la xirayaa bartamaha Julay ilaa Oktoobar.

- › Highway 5/62/55 buundada iyo gooladda xiritaanka oo dhan waa bartamaha Juun ilaa Julay:
 - Buundooyinka iyo gooladaha gelidda/bixidda **galbeedka Highway 5** halka **Highway 62/55** ay iska gooyaan ayaa bishan la xirayaa.
 - Bariga Highway 62/55 ilaa **galbeedka Highway 5** gooladdoodu waa furnaan doontaa.

INTERSTATE
494



JIDWEYNAHA INTERSTATE 494:

- › Dhinaca Bari ee I-494 sabsiyada iyo axadaha ayaa laga xirayaa buundada Minnesota River Bridge ee Mendota Heights ilaa 3rd Avenue dhanka South Saint Paul.
- › Dhinaca galbeed ee I-494 sabsiyada iyo axadaha ayaa laga xirayaa inta u dhaxeysa 3rd Avenue South Saint Paul iyo Highway 52.

- › Isgoyska I-35E/I-494 iyo agagaarka ku wareegsan waxaa la dhisi doonaa Abriil ilaa Oktoobar, oo waxaa marmar qaarkood laga xirayaa jidadka iyo gooladaha bixidda iyo gelidda.

Taariikhaha oo dhan waxay ku xiran yihiin cimiladu sida ay noqoto.

QORSHEYSO JIDADKA AAD SOO MAREYSO

Qorsheyo xilli dhismeed jidadku xiran yihiin iyo jidad cusub oo lagu aadayo Highway 5. Iska sii ogow jidadka aad qaadaneyso ka hor intaadan bixin. Xataa haddii ay yar yihiin baabuurta jidadka socota, jidadka wareegga ah ayaa wakhti kugu qaadanaya! Ku dedaal in la yareeyo faafidda COVID-19 Safarrada lagama maarmaanka ah oo keliya u soo qaado ee METRO Blue Line.


Faahfaahim dheerad ah...



Booqo oo kala soco **AroundtheAirport.com** oo lagu soo qori doono jidadka maalin kasta la xirayo, jidadka la mari iyo talooyin dheeraad ah.

MEELAHA MASHRUUCA DHISMAHA

Jidadka oo la dayactiro ama laga sameeyo burburka ilaa gooladaha iyo buundada Highway 5 iyo I-494. Sii ogow jidadka xiran iyo kuwa furan.



Mashruuca I-494 iyo Agagaarkiisa wuxuu Gaarayaa ilaa 3rd Avenue